

## Codka seeriga

Markii uu dhaco shil weyn ama musiibo ay ku jirto khatar daran ee dhaawac ama burbur hanti, waxaa suuragal ah in looga digo dadweynha Danishka nū uca khatartaan iyadoo loomaryo nidaamka digniinta seeriga elektroniga ee Qaranka Denmark.

### Nidaamka Digniinta Seeriga.

Wakaalada Maareynta Xaaladaha Deg Dega ah ee Danmerk Beredskabsstyrelsen waxey ka shaqeysiisaa joogteysiisana nidaamka digniinta seeriga.

Nidaamku wuxuu leeyahay 1,078 seeri tootal ahaan kaasi oo gaarayo 80 % dadweynaha Dabishka. Korno gaar ah oo aan go'eyn ayaa waxay u ogolataa seerigu in uu shaqeeyo hadii xataa uu ay go'antayah korontadu.

Seeriga waxaa lagu rakibay guryaha ama baalayaasha magaalada iyo magaaloyinka leh dad ka badan 1,000. Banaanka goobahaas, boolisku wuxuu isticmaali karaa seeriyaasha moobaylada laga diro.

### Digniinaha booliska

Haddii uu dhaco shil weyn ama musiibo, boolisku wuxuu go'aansankaraa in uu isticmaalo Seeriga. Islamarkaana fariin dag daga ayaa waxaa baahinayo/soo deynayiyo labada TV ee qaranka DR iyo TV2.

Boolisku wuxuu bilaabayaa seeri yeerinta. Waxey awoodaan in ay ugu digaan dhamaan dadweynaha hal howlgal. Nidaamka digniinta Seeriga waxaa sida oo kale loo isticmaali karaa gobolada ama deeganda maxaligaa halkaasi oo boolisku ka bilaabayo siideynta seeriyada si halhal ah wuxuuna u digayaa goobo qaas ah.

Dadka dhib ku qabo maqalka ama si dacif ah wax u maqlo waxey iska diiwaan galinayaan nidaamka digninta ee Beredskabsstyrelsen waxeyna helayaan digniino fariimo ah.

Laga soo bilaabo 1994 yeerin sanadle ah ee nidaamka digniinta seeriga ayaa dhacayey arbaco kaste ee ugu horeyso bisha May waqtiga duhuradii.

Dhamaan seeriyada waxaa la tijaabshaa habeen walba (Cod la'an).

### Maxey tahay inaad sameeyso?

Marka seerigu dhawaaqo Waa Inaad gudaha gasho Oo Aad dhegeysato DR ama TV2

Waxaa haboon inaad hubiso in dadka joogo dhamaan ay fahmeeen seenyaalayaasha digniinta.

DR iyo TV2 waxey ku wargalinayaan dadweynaha xaalada, waxeyna u sheegayaan awaamiirta waxa aytahay in lasameeyo. Fariimahaani waxaa laga soo dirayaa ama ka imaanayaan booliska ama doowlada.

DR iyo TV2 waxey kuugu soo qoarayaan shaashada qoraal am sawiro laxariira maclumaadka bogga 150.



Nidaamka digniinta seeriga waxaa la isticmaala haddii ay jiraan shilal waaweyn ama musiibo.

### Seenyaalahi

Seeriyaasha waxey soo saaraan seenyaale cod qaas say uga digaan xaalad khatar ah.

Seenyaaluhu waxuu ka koobanyahay cod kaasi oo ukaco si dhaqsa leh ka dibna u soo yaraado si heer heer ah. Seenyaalahaan waxaa la yeershaa afar mar guud ahaan, wuxuuna soconayaa 45 sekhan.

Seenyaalaha khatarta waxaa loo sharaxa sidaan:



Nidaamka digniinta seeriga waxaa sida oo kale la isticmaala marka khatartii jiratay ay dhamaato. Nidaamku wuxuu soo saarayaa cod seenyaale ah si loo dhameeyo khatartii jirtay.

Seenyalaha codkaan waa mid cod dheer oo isku mid ah soconayo 45 sekhan.

Seenyaaleynta codka, dhamaadka xaalada khatarta ah waxaaa loo sharaxaa sidaan:

Markii seenyaalhaan laga dhawaajiyo, waxaad si

badbaado leh u aadi kartaa banaanka mar kale.

Waxaad ka aqrisaa wax badan oo ku saabsan digniita seeriga:

[www.brs.dk/beredskab/sirener](http://www.brs.dk/beredskab/sirener) (**Iluuqada Daanishka**)